

Barnaamijka Wadaadnimada ee Dugsiga Qaranka Foomka ogolaanshaha

Macluumaadkan wuxuu kaa caawinayaa inaad go'aansato inaad u ogolaato ilmahaaga inuu helo Adeegyada Wadaadka oo uu ka helo Barnaamijka Wadaadnimada ee Dugsiga Qaranka (**NCSP**) ee Dugsiyada Dowladda Victoria.

Fadlan si taxadar leh u aqri foomkan. Haddii aad u baahato wax caddayn ah, fadlan la xiriiir **[insert School contact name]**.

In kastoo uu foomku uu adeegsanayo jumlada 'ilmahaaga' waxaad helaysaa foomkan haddii aad:

- tahay arday waayeel ah ama lagu arko inaad tahay ilmo da' yar oo masuul ah
- ilaaliye ama daryeele aan rasmi ahayn¹.

Horudhac

Wasaaradda Waxbarashada iyo Tababarka (**Wasaaradda**) waxay siisaa adeegyada waxbarasho Dowladda Victoria. Adeegyada wadaadnimada waxaa bixiya Wasaaradda ayadoo heshii kula ah Dowladda Federaalka.

Adeegga Wadaadnimada ee NSCP wuxuu ujeedaa inuu taageero wanaagga caadifadeed ee ardayga ayadoo bixinaysa adeegyada daryeelka diimeed iyo tabaha taageera wanaagga caadifadeed ee bulshada dugsiga guud.

Daryeelka diimeed macnahiisu waa daryeelidda baahiyaha shaqsiyadeed ee ardayga, keliyana maahan baahiyaha waxbarasho, ayadoo la siinayo ruuxda qofka ee guud iyo taageerada shaqsiyadeed.

Wadaadada bixinaya Adeegyada Wadaadnimada waxaa looga baahan yahay in:

- lagu aqoonsaday wadaadnimada rasmiga ah, komishanka, aqoonsi diimeed la aqoonsan yahay, ama aqoonsiga haya'd diimeed la aqoonsan yahay ama la aqbalay
- uu leeyahay xirfadaha iyo waayo-aragnimada si uu u bixiyo Adeegga Wadaadnimada.

¹ Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan yaa saxiixaya foomkan ka eeg: **Go'aan-samaynta Masuuliyadaha Ardayga** (ku yaal SPAG).

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada Wadaadnimada oo ka jirta dugsiyada dowladda Victoria waxaa laga heli karaa tilmaan-bixiyaha NSCP, oo laga helo:

www.education.vic.gov.au/school/principals/spag/safety/Pages/chaplaincy.aspx

Wadaadada dugsigaaga jooga

Dugsigaaga Adeegga Wadaadnimada waxaa bixin doona:

INSERT CHAPLAINCY SERVICE PROVIDER details:

[Name of Chaplain]

[Name of Provider]

[Address of Provider head office]



[Contact person at Provider head office]

Wadaadka waxaa laga helaa dugsiga sida soo socota:

Isniintaam ilaapm
Talaadadaam ilaapm
Arbacadaam ilaapm
Khamiistaam ilaapm
Jumcahaam ilaapm

Goobta Dugsiga:

.....
.....
.....



Noocyada Adeegga

Adeegyada Wadaadnimada oo ka jira dugsigaaga waxaa lagu bixin karaa mid ka mid ah qaababkan soo socda [delete any option that is not applicable]

- (a) hab shaqsiyadeed (wada-hadalka fool-ka-foolka ah oo ardayga lala yeesho)
- (b) qaab kooxeed (wada-hadalka koox arday ah), ama
- (c) labadaba (a) iyo (b).

Ilaalinta Gaarnimada

Wasaaradda, taas oo ay ku jiraan dhammaan dugsiyada dowladda victoria, waxay ixtiraamtaa gaarnimada shaqsi kasta waxayna ballan-qaadaysaa ilaalinta dhammaan macluumaadka shaqsiyadeed iyo caafimaad oo lagu qaaday dugsiyada. Dhammaan shaqaalaha dugsiga, qandaraasleyaasha iyo wakiilada waa inay ku dhaqmaan sharciga gaarnimada Victoria iyo qorsheyaasha gaarnimada iyo macluumaadka ee Wasaaradda.

Halkan dugsiyada Dowladda Victoria maaraynta 'macluumaadka shaqsiyadeed' iyo 'macluumaadka caafimaad' waxaa xukuma sharciga gaarnimada Victoria.

Markii la ururinayo oo la maamulayo macluumaadka shaqsiyadeed iyo caafimaad ee ilmahaaga (**macluumaadka**), wadaadku waa inuu raacaa Macluumaadka Wadaadnimada, Qorshaha Diiwaannada iyo Warbixinta (**qorshaha Wadaadnimada**). Qorshaha Wadaadnimadu waxay dhigaysaa sida wadaadada jooga dugsiyada Dowladda Victoria waa inay si quman u maareeyaan macluumaadka ardayda ay ururiyeen, ayadoo la raacayo sharciga gaarnimada Victoria. Qorsha Wadaadnimada waxaa laga helaa: www.education.vic.gov.au/school/principals/health/Pages/nscpchaplaincy.aspx.

Qaybtan ee foomka waxay soo koobaysaa qorshaha Wadaadnimada.

Ka-qaadida iyo la-wadaagidda macluumaadka ilmahaaga ku saabsan

Wadaadadu waxay ururiyaan macluumaadka ku saabsan ilmahaaga kaas oo lagama maarmaan u ah Adeegga Wadaadnimada oo la siinayo ilmahaaga.

Waxaa kaloo muhiim ah, in wadaadku macluumaadka khuseeya oo gaarka ah oo ku saabsan ilmahaaga kaliya la wadaagayo maamulaha ama shaqaalaha kale ee dugsiga kuwaas 'oo u baahan inay ogaadaan' macluumaadkaas si uu dugsiga u ogaysiiyo:

- o si wax loo baro ilmahaaga
- o taageerida bulshanimada iyo wanaagga caadifadeed ilmahaaga iyo caafimaadka ka jira dugsiga
- o looga soo baxo fulinta waajibaadka sharciyeed oo ay ka midka yihiin

- waajibka daryeelka ilmahaaga, ardayda kale, shaqaalaha iyo soo-booqdeyaasha
- samaynta isku-habaynta macquulka ah ee ardayda qabta iinta (sharciga lidka-midab-takoorka)
- inuu bixiyo goob-shaqo oo ammaan iyo haboonaan leh (sharciga caafimaadka goobta iyo ammaanka)..

Mararka qaarkood, ilmahaagu wuxuu kala hadli karaa xubnaha kale ee qoyskaaga iyo dadka kale wax ku saabsan wadaadka. Sidaas darteed, wadaadku wuxuu ururin karaa macluumaad ku saabsan dadka aan ka ahayn ilmahaaga.

Noocyada macluumaadka la ururiyey

Noocyada macluumaadka oo uu ururiyo wadaadku oo ku saabsan ilmahaaga waxay ku xirnaan doontaanoooca wada-hadalka ilmaha iyo wadaadka.

Wadaadu waxay ururin karaan macluumaadka sida cinwaanka ilmahaaga, faahfaahinta xiriirada, macluumaadka ku saabsan caafimaadka jidheed, dhimireed ama maskaxeed, faahfaahinta ku saabsan iinta ilmahaagu uu qabo iyo macluumaadka ku saabsan caqiidada diimeed ee ilmahaaga ama wuxuu raacsan yahay. d

Wadaadub waxay ku tiirsanaan doonaan macluumaadka la siiyo si ay si buuxda u bixiyaan Adeegga Wadaadnimada. Haddii wadaadku helo macluumaad aan dhammayn, sax ahayn ama dug ah, taasi waxay six un u saamayn kartaa caawimaadda ayaga la siiyo.

Kaydinta macluumaadka

Wadaadadu waxay diiwaangelinayaan oo kaydinayaan macluumaadka macquulka ah ayadoo la raacayo qorshaha Wadaadnimada.

Helidda macluumaadka

Waad heli kartaa waana sixi kartaa macluumaadka shaqsiyadeed oo ku saabsan adiga iyo ilmahaaga oo ay hayso Wasaaradda ayadoo la raacayo sharciga Madaxbanaanida Macluumaadka. Fadlan la xiriir:

Information Management Unit

Department of Education & Training
2 Treasury Place, East Melbourne VIC 3002
(03) 9637 3961
foi@edumail.vic.gov.au

Kala noqoshada ogolaanshaha

Waad kala noqon kartaa ogolaanshahaaga mar kasta ayadoo qoraal loo diro dugsiga. Kala-noqoshada ogolaanshahaaga macnaheedu waa in ilmahaagu uusan sii heli doonin wax adeeg Wadaadnimo ah.

Macluumaad dheeraad ah

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan NSCP waxaa laga helaa website-ka DET oo ah: <http://www.education.vic.gov.au/school/principals/health/Pages/nscpchaplaincy.aspx>.

Awooddaada iyo Ogolaanshahaaga

Waxaan awoodsiinayaa oo u ogolaanayaa wadaadka siinaya adeegyada ilmahayga.

Waxaan xaqiijinayaa inaan aqriyey Foomkan Ogolaanshaha oo aan fahmey:

- sida macluumaadka shaqsi ee ilmahayga uu u qaadi doono una maareyn karo wadaadku
- in ogolaanshahaygu uu socon doono inta ilmahaygu ku qoran yahay dugsi dowladda ee Victoria
- inaan ka noqon karo ogolaanshahayga mar kasta
- in haddii wadaadku go'aansho in Adeegga Wadaadnimada uusan u baahnayn ilmahaygu inay istaagi doonto.

Magaca Ardayga	
Da'da dhalashada:	
Saxiixa ardayga (ikhtiyaar)	
Taariikhda	____ / ____ / _____
Magaca Qofka 1aad	
Xiriirka uu la leeyahay ardayga	
Saxiixa Qofka 1aad oo bixinaya ogolaanshaha	
Taariikhda	____ / ____ / _____
Magaca Qofka 2aad (ikhtiyaar)	
Xiriirka uu la leeyahay ilmaha	
Saxiixa	
Taariikhda	____ / ____ / _____
Haddii aad tahay arday waayeel ah ama lagu aqoonsaday inaad tahay ilmo yar oo masuula waad saxiixi kartaa foomkan. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cidda saxiixaysa foomkan ka eeg: Go'aan-samaynta Masuuliyadaha Ardayga (ku yaal SPAG).	